

Goor dhow waad safri doontaa - haddii aad caafimaad qabtid, oo aad raacdid shuruucda.

Laga bilaabo 13-ka bisha juun waad ku dhax safri kartaa Iswiidhan gudaheeda. Laakiin weli khatartii ma dhamaan. Waa in aad shuruucda raacdaa oo aad caafimaad qabtaa.

Dadku sidii la rabay bey sameeyeen intii lagu guda jiray cudurkan faafa ee karoonaha. Sidaa darteed ayey xaaladda Iswiidhan u yara wanaagsanaatay hadda. Laga bilaabo 13-ka bisha juun qofku waa uu ku dhax safri karayaa gebi ahaan waddanka gudihisa. Laakiin cudurkan faafa weli khatartiisii may dhamaan, oo weli waxa jirta khatar ah in cudurkani fido. Sidaa darteed waa in dhamaan lawada qaataa mas'uuliyadda sidii hore oo kale.

Haweenka iyo ragga waxaa ka saaran bulshada mas'uuliyad gaar ah in ay raacaan talooyinka loo soo jeedinayo. Haddii uu qofku isku arko calaamadaha cudurka Karoonaha ee la is qaadsiiyo, qofku ma safri karayo. Xataa hadii uu qofku isku arko calaamado yar.

Sidoo kale waxa ay mas'uuliyada saarantahay dadka hor joogayaasha ka ah kaamamka, tareenada, basaska, maqaayadaha oo ay tahay in ay raacaan sharciyada adag. Sidaa darteed ayey dawladdu go'aansatay in ay degmooyinku hubiyaan in ay dadkani u hogaansamayaan sharciga.

Marba marka ka danbeysa waxa aan wax badan ka baraneynaa wax badan oo ku saabsan cudurkan, oo aan wax ka badalnaa shuruucda goortii aan helno aqoon. Hadda waxa aan ognahay in ay waajib tahay in aan siiwadno in aan raacno dhammaan sharciyada quseeya cudurkan Karoonaha. Tusaale ahaan waa in aynu kala fogaanaa, oo aanan tegin meelaha dadku ku badan yahay. Ka tag meeshaas oo meel kale doono. Haddii ay is qaadsiiintu yaraato inta lagu gudo jiro xagaaga waxaa dhici karta in shuruuc kale oo cusub la gaadho.

"Haddii qof safar aadayo waa in uu aad uga fikiraa", sidaa waxaa yiri ra'iisal wasaaraha Stefan Löfven, mar uu qabtay shir jaraa' id.

Dad badan ayaa la baari doonaa.

Hada waxa la soo saaray hab baaritaan oo uu qofku ku kalsoonaan karayo. Baaritaankan waxaa lagu ogaan karaa in aad hadda qabto cudurkan amaba uu horay kuugu soo dhacay. Sidaa darteed baan sameyn doonaa baaritaano dhowr ah, si loo raad raaco fidida cudarka. Gobolkeena waxaa baaritaanka u qaabilsan gobolka Kalmar.

Habka baaritaankani u dhacayo wey ku kala duwan yihiin gobolada wadanka. Waxa hadda la ogyahay waxa ay tahay in laga bilaabi doono dadka calaamadaha cudurka leh ugu horreyn. (Baaritaanku waa lacag la'aan), gobolada iyo dawladdu/qaranku waxa ay hadda ka wada hadlayaan sidii baaritaanka loo sameyn lahaa. Qiyaastii todobaad gudihis ayaa ay ku heshiin doonaan habkii loo fulin lahaa.

Marka aan bilowno baaritaanka dad badan, waxaa muuqan doonta in dad badani cudurkan qaadeen, laakiin taasi waxa ay ka dhigantahay baaritaankii oo batay keliya.



Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawlada ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.



**VÄSTERVIKS
KOMMUN**



facebook.com/krissamverkan.kalma
facebook.com/vastervikskommun